# Ansixinta wax-ka-beddel xeer oo ku saabsan shahaado koroona

**Wax-ka-beddelladii lagu sameeyay xeerka ka hortagga cudurrada faafa ee jidaynayey in shahaadada koroonaha lagu isticmaali karo Norway, ayaa la ansixiyay oo maantana dhaqangalaya.**

Ujeedada qodobada cusub ee xeerka ayaa ah in la helo nidaam keenaya in si la hubo oo la xaqiijin karo loo caddayn karo tallaalka la qaatay, cudurka koroonaha ee qofka ku dhacay iyo natiijada tijaabooyinka. Waxa kale oo wax-ka-beddellada xeerku jidaynayaan in waddanka laga hirgeliyo xeerarka Midowga Yurub ee shahaadada koroonaha islamarkaana waxay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelku helaysaa awood ay ku nidaamiso isticmaalka shahaadada koroonaha iyadoo soo saari karta xeer-hoosaadyo marka loo baahdo.

– Waa muhiim in aan hoosta ka xarriiqo in aan shahaadada koroonaha loo isticmaali doonin in dadka lagu xadido. Waxa loo sticmaalayaa in la sameeyo fududayn. Waxa tusaale ahaan la isticmaali karaa marka laga qaybgalayo qabanqaabo weyn oo aan markeeda hore la oggolayn in laga qaybgalo haddii aan la haysan shahaado, ama in la furo adeegyo aan sida kale furnaadeen, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

– Waddanka gudahiisa waxa isticmaalka shahaadada koroonaha la bilaabaya marka la galo heerka 3-aad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka. Toddobaadka dambe ayaanu soo bandhigi doonnaa habka loo fulin doono arrintan, ayay raacisay.

Isticmaalka shahaadada koroonaha waxa la joojinayaa marka heerarka faafidda cudurka iyo tallaaliddu ay gaadhaan in xayiraadaha laga maarmi karo. Ma dhici doonto in si joogto ah ama muddo dheer ah shahaadada koroonaha looga isticmaalo Norway, islamarkaana waxa la soo jeediyay in isticmaalka xeerarka Norway lagu koobo lix bilood.

**Ilaalinta xogta qofka**

Shahaadada koroonahu waxa ay leedahay labo muuqaal: muqaal fudud oo caadi ahaan ku filan in lagu isticmaalo waddanka gudahiisa, iyo muuqaal xog dheeraad ah wata oo caadi ahaan la isticmaalayo marka laga gudbayo xuduudaha aagagga Midowga Yurub iyo Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS). Shahaadada koroonahu waxa ay leedahay QR la hubin karo.

Ilaalinta xogta qofka ayaa sabab u ah in shahaadada koroonaha labo muuqaal loo sameeyo. Waxay keenaysaa in qofku ka maarmo in uu bixiyo xog ka badan inta looga baahan yahay. Marka waddanka gudahiisa lagu isticmaalayo waxa loo baahan yahay keliya in la soo bandhigo shahaado shaqaynaysa oo inta badan ma loo baahna macluumaad kale.

Nidaamka shahaadada ee Yurub ka dhexeeya waxa uu diyaar yahay bilowga bisha Julaay.

– Laakiin laga bilaabo saacadda 15.00 Jimcaha 11-ka Juun ayuu boolisku bilaabayaa hubinta shahaadooyinka koroonaha ee noorwiijiga ah marka laga soo gudbayo xuduudda. Arrintaasi waxa ay yaraynaysaa cudurka ka imanaya dibeddaha, ayay tidhi Monica Mæland oo ah wasiirka caddaaladda.

Shahaadada koroonuhu waxa ay ku jirtaa helsenorge.no, waxaana lagu soo dejisan karaa moobaylka ama waa la soo daabacan karaa iyadoo warqad ah.

**Qaybta Midowga Yurub ayaa wadata xog dheeraad ah**
- Midowga Yurub waxa uu rabaa macluumaad dheeraad ah marka laga gudbayo xuduudaha, waxaana loo baahan yahay in la kala saari karo tallaalka la qaatay, tijaabooyinka la iska qaaday iyo in cudurku qofka ku dhacay. Waxa loo baahan yahay in la arki karo magaca tallaalka, tirada tallaalka iyo taariikhda tallaalka la qaatay. Taas darteed waxa shahaadada ku jiri doona qayb wadata xog dheeraad ah oo loo isticmaali doono arrimahaas, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Dawladdu waxa ay weli dadka kula talinaysaa in ay iska dhaafaan safarrada laga maari karo ee lagu tegayo dibedda. Talooyinka safarradu waxay sii soconayaan ilaa 1-da Julaay waxaana dib-u-eegis lagu samayn doonaa wakhtigaas ka hor. Dadka safarka gelaya waa in ay sii ogaadaan xeerarka karantiilka iyo ka hortagga cudurka ee ka jira waddanka ay ku socdaan. Waddamadu way kala xeerar duwan yihiin.

**Tijaabo bilaash ah**
Nidaamka shahaadada koroonahu waxa uu caadi ahaan dhigayaa in tijaabo la iska qaaday ay la siman tahay tallaalka la qaatay iyo cudurka covid-19 ee qofka ku dhacay. Laakiin natiijada tijaabadu waxay sheegaysaa keliya xaaladda jirta xilliga tijaabada la iska qaaday oo taas darteed markasta lama miisaan noqon karto ka difaacnaanta cudurka. Tusaale ahaan tijaabo la iska qaaday ma keenayso in qofka laga dhaafo karantiilka soo gelidda waddanka.

– Isticmaalka shahaadada koroonuhu waxay u baahan tahay in awooda tijaabo-qaadistu wacan tahay. Waxannu taas darteed bilaabaynaa nidaam ay dawladdu ku maalgelinayso tijaabo-qaadista ay sameeyaan goobaha gaarka loo leeyahay. Waxa la isticmaalayaa tijaabada degdegga ah ee *antigen*, waana in natiijada la geliyo diiwaanka MSIS si ay uga muuqato shahaadada koroonaha. Dadka oo dhan waa u bilaash in ay tijaabo iska qaadaan, ayuu yidhi Høie.

Waxa jiri doono shuruuddo laga rabo goobaha gaarka loo leeyahay, si lacagta loogu celiyo. Waxa ka mid ah in jawaabta tijaabada la geliyo MSIS. Goobaha gaarka loo leeyahay ee buuxiya shuruudaha waxa halkii tijaabo loo celinayaa lacag go'an. Nidaamkani waxa uu shaqayn doonaa oo la isticmaali doonaa marka la galo heerka 3-aad ee qorshaha dib-u-furidda.